

Car Seats Made Simple



Liiska Warbixinta 6aad: Suumanka kursiga

Muhiim: Kan waa liis warbixineedka guud ee loo samayay in lala kaashado diiwaanka gaariga iyo diiwaanka warbixinta kursiga gaariga ee cunugaaga. Si aad u dadajisid waxtarka liiska warbixinta kaasho oo hadba isha mari diwaanadaas.

Caruurta uu dherarkooda yahay 4 cagood 9 inji ama ka dheer una dhow in ay jiraan 8 sano waxa si caadi ah u deeqaya gaariga suunkiisa dhabta iyo suunka garbaha.

___1) Xaqiijiso in joogga cunuggaaga uu yahay mid u si ammaan leh uu ugu safri karo isago xiran suunka gaariga.

- Cunugaaga dhabarkiisa ama dhabarkeeda gadaal ma u riixayaa kursiga gaariga?
- Jilibka cunugaaga si waasac ah ma ugu laabmaya geeska kursiga gaariga?
- Lugaha cunugaaga ma taabanyaa salka gaariga?
- Suumanka garbaha si dadban uma hayaan xabadka cunugaaga (aan ahayn wajiga ama gacmaha kore)?
- Qaybta dhabta ee suunka ma ka hooseeya miskaha ama simanka?
- Cunugaaga si waasacan sidatan ma u fadhiyi karaa safarka oo idil?



Haddii aad “haa” ugu jawaabtay su’aalahaan oo dhan, cunugaaga waa uu raaci karaa gaari isticmaala nooca gaariga suunka leh. Haddii aad mid kamid su’aalaha aad “maya” ku jawaabtay, cunugaaga wuxuu u baahanyahay kursiga kor loo qaado si uu si ammaan ah uu ugu safro gaariga. Marka suunka la mariyo garbaha gadashooda ama gacmaha hoostooda, iyaga oo hoos ugu dhacaya kursiga oo halka hoose taabanaya, waxay taasi muujinaysaa in cunugaaga uu weli uu bahaanyahay wax kursiga kor u qaada.

___2) Caruurta ka yar 13 sanadood waa inay fadhiistaan kursiga dambe ee gaariga.

Sida wax loo sameeyo fiidiyaha ka fiirso: “Ammaanka Gaariga ee Cunugaaga Weyn” lagala xariirayo <http://www.chop.edu/carseat>